

Shuruudaha Tababarka iyo Jadwalka Dhamaystirka

Adeeg Bixiyaasha Waxbarashada Dhallaanka: U qaado dukumiintigaan xog kooban oo ku saabsan shuruudaha adeegga hore iyo tababarka ee dhammaan waajibaadka ay qasab tahay in lagu dhameeyo waqtiga loo cayimay iyo dhammaan mudada xirfadooda.

Xasuusnoow:

- Adeeg bixiyaasha Waxbarashada Dhallaanka iyo xubnaha qoyska ee jira 13 sano iyo kawayn ee dhigta barnaamijka waxbarashada dhallaanka waa inuu maraa hubinta shaqsiyada waaxda oo waafaqsan WAC 110-06. Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, booqo <http://apps.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-06>.
- Adeeg bixiyaasha waxbarashada dhallaanka, mutadawiciinta, iyo xubnaha qoyska ee barnaamijka waxbarashada dhallaanka ee guriga qoyska lagu baxsho kuwaasoo jira 14 sano iyo ka wayn waa inay keenaan dukumiintiyo la saxiixay 12 billood ee ugu danbeeyay uuna saxiixay xirfadle caafimaad kuwaasoo muujinaaya baaritaanka xanuunka qaaxada (TB) ama daawaynta (fiiri WAC 110-300-0105, qaybta 3 aad).
- Dhammaan adeeg bixiyaashu waa inay isla diiwaan gashaan diiwaanka shaqaalaha ee elektarooniga ah (MERIT) kahor intaan la siin ruqsada ama kahor intaysan la shaqayn carruur aan lagu kormeerayn.



Dulmarka shuruudaha Tababarka

- Shuruudaha Adeegga Kahor – WAC 110-300-0105
- Shuruudaha Tababarka - WAC 110-300-0106
- Tababarka Gudaha Shaqada – WAC 110-300-0107

Shaxda 1 aad: Dulmarka Shuruudaha Tababarka

| Doorka | Shuruudaha Tababarka | Shuruudaha Gudaha Shaqada |
|---|---|---|
| Ruqsadlaha Adeegga Gurigga Qoyska Agaasimaha Xarunta Kaaliyaha Agaasimaha Kormeeraha Barnaamijka | <ul style="list-style-type: none"> • Tababarka Ruqsada (hadduu jiro) • Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta* • Gargaarka Degdega/CPR • Xanuunada Dhiiga ku Dhasha • Ruqsada Bixiyaasha Cuntada (hadday jiraan) • Hurdo Caafmaad leh (haddii loo baahdo) | <ul style="list-style-type: none"> • Tababarka Sanadlaha ah ee Shaqada Lagu dhex sameeyo ee 10 saacadood ah • Kor u Qaadista Tayada Waxbarashada Dhallaanka |
| Hogaanka Macalimiinta | <ul style="list-style-type: none"> • Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta* • Gargaarka Degdega/CPR • Xanuunada Dhiiga ku Dhasha • Ruqsada Bixiyaasha Cuntada (hadday jiraan) • Hurdo Caafmaad leh (haddii loo baahdo) | <ul style="list-style-type: none"> • Tababarka Sanadlaha ah ee Shaqada Lagu dhex sameeyo ee 10 saacadood ah • Kor u Qaadista Tayada Waxbarashada Dhallaanka |

*Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta waxaa lagu bixiyaa tababarada ku qoran WAC 110-300-0106 farqooyinka 4-7 iyo 10 aad. Tan waxaa ku jira waxyaabaha soo socda: Aqoonsiga iyo Soo Sheegida Xadgudubka (0106 qaybta 4 aad), Diyaar Garoowga Xaaladaha Degdega ah (0106 qaybta 5 aad), Kahortaga Cudurka Ka dhasha Ruxida Ilmaha (0106 qaybta 6 aad) U adeegida Carruurta Waajahaaya Hooy La'aanta (0106 section 7), Maaraynta Daawada (0106 qaybta 10 aad).



Shaxda 1 aad: Dulmarka Shuruudaha Tababarka

| Doorka | Shuruudaha Tababarka | Shuruudaha Gudaha Shaqada |
|--------------------------|--|--|
| Kaaliyaha Macalinka | <ul style="list-style-type: none"> Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta* Gargaarka Degdega/CPR Xanuunada Dhiiga ku Dhasha Ruqsada Bixiyaasha Cuntada (hadday jiraan) Hurdo Caafmaad leh (haddii loo baahdo) | <ul style="list-style-type: none"> Tababarka Sanadlaha ah ee Shaqada Lagu dhex sameeyo ee 10 saacadood ah Kor u Qaadista Tayada Waxbarashada Dhalaanka |
| Kaaliye | <ul style="list-style-type: none"> Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta* Xanuunada Dhiiga ku Dhasha Ruqsada Bixiyaasha Cuntada (hadday jiraan) Hurdo Caafmaad leh (haddii loo baahdo) | Tababarka Sanadlaha ah ee Shaqada Lagu dhex sameeyo ee 10 saacadood ah |
| Mutadawac – Socda | <ul style="list-style-type: none"> Xanuunada Dhiiga ku Dhasha Hurdo Caafmaad leh (haddii loo baahdo) Tababarka Caafimaadka iyo Badqabka – Aqoonsiga iyo Soo Sheegida Xadgudubka, Diyaar Garoowga Xaaladaha Degdega ah, U adeegida Carruurta Waajahaaya Hooy La'aanta, Kahortaga Cudurka Ka dhasha Ruxida Ilmaha (haddii loo baahdo) | N/A |
| Mutadawac – Mararka qaar | N/A | N/A |

*Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta waxaa lagu bixiyaa tababarada ku qoran WAC 110-300-0106 farqooyinka 4-7 iyo 10 aad. Tan waxaa ku jira waxyaabaha soo socda: Aqoonsiga iyo Soo Sheegida Xadgudubka (0106 qaybta 4 aad), Diyaar Garoowga Xaaladaha Degdega ah (0106 qaybta 5 aad), Kahortaga Cudurka Ka dhasha Ruxida Ilmaha (0106 qaybta 6 aad) U adeegida Carruurta Waajahaaya Hooy La'aanta (0106 section 7), Maaraynta Daawada (0106 qaybta 10 aad).

Jadwalka Dhamaystirka Tababarka

- Shuruudaha Adeegga Kahor – WAC 110-300-0105
- Shuruudaha Tababarka – WAC 110-300-0106

Shaxda 2 aad: Jadwalka Dhamaystirka Tababarka

| Shardiga | Xiliga ay Qasab Tahay in Shardigaan Tababarka La Buuxiyo? | Sidee ayaa Shardiga Tababarka Lagu Dhamaynayaa? |
|-----------------------------------|--|---|
| Tababarka Laysinka | <ul style="list-style-type: none"> Kahor intaan qofku la wareegin masuuliyada barnaamijka 50% ama ka badan waqtiga Tababarkaan waa hal mar | <ul style="list-style-type: none"> DCYF lagu baxsho oonleena DCYF lagu baxsho si toos ah: ka fiiri barta oonleena ah www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/licensed-provider/licensing-process |
| Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta* | <ul style="list-style-type: none"> Kahor intaan lagu siin ruqsad Kahor intaadan u adeegin carruur aan lagugu kormeerayn Tababarkaan waa hal mar | <ul style="list-style-type: none"> Dhamayso Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta oo uu bixinaayo tababare gobalka aqoonsi ka haysta, ayna oonleena ku bixinayso DCYF ama koorso kuleej Dhamayso Tababarka Caafimaadka, Badqabka iyo Nafaqada ee ECED&107 (qayb kamid ah Shahaadada Koowaad) kaasoo buuxinaaya shardiga Tababarka Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta |
| Xanuunada Dhiiga ku Dhasha | <ul style="list-style-type: none"> Kahor intaan lagu siin ruqsad Kahor intaadan u adeegin carruurta Tababarkaan waxaa loo sameeyaa sida ay amarto Department of Labor & Industries (Waaxda Shaqaalaha iyo Warshadaha) | Waydii wakaaladaha maxaliga ah ee tababarkaan baxsha |

*Haddii aad horay u shaqaynaysay marka sharcigaan dhaqan galay, tababarka Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta waa inaad ku gashaa sadex billood gudahood laga bilaabo marka qaybtaan dhaqan gasho. Dhammaan shaqaalaha cusub waa inay dhamaystaan Asaasiyaadka Daryeelka Carruurta kahor intaysan la shaqayn carruurta ayagoon la kormeerayn.

Shaxda 2 aad: Jadwalka Dhamaystirka Tababarka

| Shardiga | Xiliga ay Qasab Tahay in Shardigaan Tababarka La Buuxiyo? | Sidee ayaa Shardiga Tababarka Lagu Dhamaynayaa? |
|----------------------------|---|--|
| Gargaarka Degdega/ CPR | <ul style="list-style-type: none"> Kahor intaadan u adeegin carruur aan lagugu kormeerayn Tababarkaan waxaa loo sameeyaa sida ay amarto Department of Labor & Industries (Waaxda Shaqaalaha iyo Warshadaha) | Waydii wakaaladaha maxaliga ah ee tababarkaan baxsha |
| Ruqsada Shaqaalaha Cuntada | <ul style="list-style-type: none"> Kahor intaysan u diyaarin ama siin cunto carruurta Tababarkaan waxaa loo sameeyaa siday amarto waaxda caafimaadka maxaliga ah | Waaxda caafimaadka maxaliga ah ee deegaankaaga |
| Hurdo Caafimaad Leh | <ul style="list-style-type: none"> Kahor intaan lagu siin ruqsad Kahor intaadan daryeelin saqiirada Tababarkaan waxaa la qabtaa sanad kasta | Tababarka DCYF ee lagu bixiyo oonleena |

Shuruudaha Tababarka Mutadawaca: Tababarada ku qoran WAC 110-300-0106 qaybaha 4-7 iyo 10 aad ayaa ku jira tababarka Aasaasiyaadka Daryeelka Carruurta. Haddii tababare uusan marin Tababarka Aasaasiyaadka Daryeelka Carruurta (kaasoo aan laga doonayn mutadawiciinta), mutadawac ayaa geli kara tababaradaan oo ah tababaro gaar-gaar ah si bilaash ahna ay oonleen ugu bixinayso DCYF.

Shuruudaha Tababarka Gudaha Shaqada

WAC 110-300-0107

Xasuusnoow:

- Adeeg bixiyaasha waxbarashada dhalaanka ayaa samaynaaya 10 saacadood oo tababarka shaqada dhexdeeda lagu baxsho ee sanadlaha ah.
- Tababarka gudaha shaqada ayaa qasab ah kadib 12 billood oo qofku shaqaynaayay.
- Shuruudan tababarka sanadlaha waxay ku saleysan tahay jadwalka sanadka ee DCYF (Janaayo 1 – Diseembar 31).
- Shanta saacadood ee adeega tababarka waxa la sameyn karaa laga bilaabo hal sanad jadwal ah ilaa jadwalka sanadka xiga.
- “Saacadaha STARS” ama “tababarka gobalku fasaxay” ayaa ah erayo kale oo badanaa loo adeegsado tababarka “gudaha shaqada.”

Shaxda 3 aad: Shuruudaha Tababarka Gudaha Shaqada

| Shardiga | Xiliga ay Qasab Tahay in Shardigaan Tababarka La Buuxiyo? | Sidee ayaa Shardiga Tababarka Lagu Dhamaynayaa? |
|--------------------------|--|---|
| Tababarka Gudaha Shaqada | <p>Tababarka Kor U qaadista Tayada Waxbarashada Ubadka ayaa la sameeyaa labada sano ee ugu horeeya (20 saacadood) oo ah tababarka gudaha shaqada ah.</p> <ul style="list-style-type: none"> Wuxuu adkeeyaa aasaasiga Daryeelka Carruurta Waxyaabaa tababarka lagu baxsho waxaa kamid ah: Wada Shaqaynta Qoyska, Dhawrista Dhaqanka, Bii'ada iyo Isdhexgalka | <p>Kor U qaadista Tayada Waxbarashada Dhalaanka waxaa abuurta bixisana DCYF ama qandaraaslayaal. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan helitaanka, ka fiiri barta oonleena ah https://apps.dcyf.wa.gov/MERIT/Search/Trainings.</p> <p>Dookhyada kuwaas u dhigma:</p> <ul style="list-style-type: none"> Shahaadada Kooban ee ECE ee Gobalka Washington ama mid ka saraysa Waxbarasho ay aqoonsan tahay DCYF ama shahaado u dhiganta Shahaadada Kooban ee ECE |
| | <p>Kadib markaad dhamayso Tababarka Kor U qaadista Tayada Waxbarashada Dhalaanka:</p> <ul style="list-style-type: none"> Toban saacadood oo tababarka gudaha shaqada ah ayaa la sameeyaa sanad kasta (Janaayo 1 – Diseembar 31). Ruqsadleeyda adeegga guriga qoyska, agaasimayaasha xarunta, kaaliyaasha agaasimaha, iyo kormeerayaasha barnaamijka ayaa samaynaaya 10 saacadood oo tababarka Xirfadaha Hogaaminta ah* sadexdii sanaba mar | <ul style="list-style-type: none"> Tababar gobalku aqoonsan yahay Tababarada kale waa inay waafaqaan Kartiyada Aasaasiga ah ee ECE ee Gobalka Washington Koorsooyinka kuleejka ee waafaqsan Kartiyada Aasaasiga ah ee ECE ee Gobalka Washington |

* Tababarka xirfadaha hogaaminta waxaa ku jira Kartiyada Aasaasiga ah ee Gobalka Washington ee soo socda: qorshaynta iyo hormarinta barnaamijka, hormarinta xirfada, iyo hogaaminta.

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, dalka uu ruuxu kasoo jeedo, xaalada dhalashada ama soo geleytiga dalka, rabitaanka galmo, ama aqoonsiga jinsiga, xaalad ciidan, xaalada naas nuujinta hooyada, iyo jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed ama isticmaalka arka haga ama xayawaanka ruuxa haga. Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqaad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov. DCYF PUBLICATION EPS_0050 SM (09-2024) Somali